

CAREER CONVERSATION STARTERS

for Middle School Families

Aqoonsiga Waxyaabaha Xiisaynta iyo Awoodaha Shakhsiga

Killiyada dugsiga dhexe ayaa ah wakhti ku haboon ay caruurta bartaan wax badan oo naftooda ku saabsan oo ay ku jiraan waxa ay xiiseeyaan, waxa ay ku fiican yihiin, waxa ay ku raaxaystaan samayntooda, iyo waxa aanay jeclayn. Tani ayaa ka caawisaa carruurta inay helaan xirfad wanaagsan oo waxtar u leh mustaqbalkooda. Waxaad weydiin kartaa ardayda digata dugsiga dhexe su'aalaha ay ka mid yihiin:

Maxay yihiin waxyaalaha qaar ee aad runtii ku raaxaysato? Waa maxay sababtu?

Waa maxay fasalka aad ugu jeceshahay? Waa maxay sababtu? Waa maxay waxyaabaha aad dhawaan ku raaxaysatay barashadooda?

Maxaad u malaynaysaa inaad ku fiican tahay? Sidee ku ogaatay inaad ku fiican tahay? Qof miyaa kuu sheegay? Miyay kuu fududahay adiga?

Ma samaysay howlo aad ka baratay xirfadaha qaarkood oo u muuqda kuwo xiiso leh oo laga yaabo inay muujinaayaan waxyaabo aad ku fiican tahay inaad qabato? Sidee u aragtaa natiijooyinkaaga ku aadan hawlahaan?

Waa maxay howlaha aad ka samaysay dugsiga ee kaa caawiyay inaad wax ka ogaato waxyaabaha aad xiisayso, xirfadahaaga ama kartidaada? Maxaad ka baratay naftaada?

Maxaadan jeclayn ama maxaad u malaynaysaa inaad ku fiican tahay? Waa maxay sababtu?

HOWLAHA LA ISKU DAYO SIDII QOYS AHAAN:

Buuxi xog-uruurinta iyo ciyaaraha fikirka maskaxda u baahan. Dugsiga ilmahaagu ayaa laga yaaba inuu bixiyo qaar ka mid ah waxyaabahaas oo waxaad sidoo kale ka heli kartaa xog-uruurin bilaash ah oo ku saabsan waxyaabaha xiisaynta www.mynextmove.org/explore/ip

Eeg agabyada Ohio Means Jobs adiga oo booqanaya go.osu.edu/omjresource

Middle Years to Careers

CAREER CONVERSATION STARTERS

for Middle School Families

Aqoonsiga Xirfadaha

Iyadoo ardayda dugsiyada dhexe ay baranayaan waxa ay xiiseeyaan iyo kartida ay leeyihiin, waxa ay sidoo kale bilaabi karaan in ay wax badan ka bartaan xirfadaha mustaqbalka u noqon kuwo waxtar leh. Dugsiyo badan ayaa ka caawiya carruurta inay ogaadaan sida loo barto xirfadahan ama waxay ka caawiyaan inay aqoonsadaan "qaybaha xirfadaha" (kooxaha xirfadaha ee waaweyn ee ku saleysan tayada ay wadaagaan, tusaale ahaan, cilmiga caafimaadka, adeegyada aadanaha, iwm.). Marka guriga la joogo, waxaad ka caawin kartaa taageerida aqoonsiga xirfadda adiga oo weydinaya ardaygaaga dugsiyada dhexe:

Maka baratay wax xirfado ah oo adiga ku xiiso galiya? Maxaa ka mid ah oo adiga kuu xiiso galiyay?

Xirfadee ayaad u malaynaysaa inaad ku wanaagsan tahay? Waa maxay sababtu? Maxaad ka baratay xirfaddan? Sidee xirfaddan ugu habboon tahay meelaha aad ku fiican tahay ama aad xiisaynayso?

Ma taqaan qof shaqadan qabta? Maxaad u malaynaysaa in qofka shaqadan qabta uu sameeyo maalin kasta?

Heer waxbarasho nooc ah ayaa loo baahan yahay si loo galo shaqadan? Koorsooyinkee ayaad ku qaadan kartaa dugsiyada dhexe ama sare ee kaa caawin doona inaad u diyaargarowdo shaqadan ama ugu yaraan kaa caawin doona inaad aragto haddii aad jeceshahay?

HOWLAHA LAGU QABTO GURIGA

Aqoonso qaybaha xirfadaha iyo tusaalooyinka koorsooyinka loo heli karo xirfadaha kala duwan adiga oo booqanaya go.osu.edu/odecareerpaths. Waxaad eegi kartaa agabyada qoraallada PowerPoints-ka iyo PDF-ka si aad u ogaato xirfadaha qayb kasta.

Onlaynka ka eeg muuqaallada xirfadaha. Youtube ayaa ka baari kartaa adiga oo qoraaya weedha "maalin ka mid ah noloshayda" oo raacinaya magaca xirfadda mynextmove.org adiga oo ka baaraya qaybaha xirfadda. Xirfaddo badan oo ku jira ayaa leh muuqaal.

Middle Years to Careers



Aqoonsiga Illaha Bulshada

Waxaad xidhiidh la samayn kartaa ganacsiyada iyo ururada bulshada kuwaas oo ka caawin kara ardaydaada dugsiga dhexe inay horumariyaan xirfadaha muhiimka ah ee la xidhiidha shaqada ama ay wax badan ka bartaan xirfadaha ay xiiseeyaan. Waxaa mararka qaarkood laga yaaba in kooxahani ay bixiyaan fursado ay ilmuhu kaga qaybqaataan howlaha xilliga dugsiga ka dib ama xilliga xagaaga. Way ku caawin kartaa inaad kala hadasho fursadahan oo kale ilmahaaga. Ma arday dugsiga dhexe dhigta ayaa tahay:

Dugsigaagu ma bixiyaa wax fursad ah oo ku aadan ikhtiyaarada ka qaybgalka waayo-aragnimada shaqeed ee bulshada dhexdeeda? Hadday sidaas tahay, ma xiisaynaysaa tan?

Ma maqashay wax howlo ah oo ka socda meel ka baxsan dugsiga oo adiga ku xiiso geliya?

SU'AALAHA LA WAYDIINAYO LA-TALIYAHA DUGSIGA AMA MAAMULAHA:

Ma taqaanaa ganacsiyo ama ururo ka mid ah bulshada kuwaas oo fursadaha siiya ilmaha si ay uga qaybqaataan xirfadaha shaqooyinka?

Ma jiraan fursado uu ilmahaygu kaga qayb galaayo bandhigyada xirfadaha shaqada?

Ma jiraan barnaamijyada kaamamka ama xagaaga kuwaas oo taageeraan horumarkooda xirfadeed (tusaale ahaan, kaamamka cunto karinta, kaamamka barashada farsamooyinka)?

Ma taqaanaa oo ma haysa wax xiriir cawiimeed oo aad ilmahayga kaga caawin karto si uu u helo waayo-aragnimada khibradaha shaqada? Dugsiga ardayda ma siiya wax fursado ku aadan barashada khibradda shaqada ah?